

WARGELINTA GURYAHA



Mas'uuliyada meesha
aad degan tahay

Pako^{Suomen}aisapu

Masuuliyada meesha aad degan tahay

Gurida aad degan tahay waxaa jira masuuliyar dhowr ah oo la doonayo inuu qofka si fiican u famho. Hagaajinta guriga hadba xaaladaha kala duwan masuuliyada waa la kala leeyahay, qaar waa inaad u deysaa shaqaalaha khibradda u leh.

Masuuliyadda qofka guriga degan

- Qofka guriga degay ayaa la heshiinayo shirkadda koronta.
- Qofka guriga degay ayaa sameynayo ceymiska guriga.
- Ka warqabka mashiinka hawada qaada ee guriga gaar ahaan jikada.
- Nadiifinta dhulka guriga.
- Nadiifinta balakoonaha iyo saunada.
- Nadiifinta biyo mareenada dhulka guriga iyo jikadaba sida shabaqa hawada qaada.
- Badelida nalalka iyo fiyuusyada guriga.
- Soo gadashada aaladda dabka sheegta iyo barashada isticmaalkeeda.
- Ilaalinta qalabka guriga yaala iyo in loo isticmaalo sida loogu talagalay.
- Qofku waa inuu baneeyaa maqaasiinka hoose marka uu ka guurayo guriga.

Masuuliyadda shirkadda guriga

- Arin deg deg ah oo muhiim ah in wax laga qabto guriga sida biyomareenka oo xirma ama cilad xagga korontada ah.
- Arindeg deg ah sida biyo ku furmay meelaha dadka ka dhexeeya, ama sameynta daaqadaha.
- Dayactirka hiitarada iyo arimaha la xiriira kuleylinta dhismaha.
- Dayactirka ama hagaajinta daaqadaha guriga haddii loo baahdo.
- Shirkada guryaha waxa ay qabataa howlo waaweyn sida xaaqidda barafka iyo ku shubida quruuruxa/jaayga xilliga qaboobaha ama dayactir xagga dhismaha.
- U furida qofka guriga degan, haddii uu furihiisa uga tago guriga (waana lacag).
- Sumeynta cayayaanka guriga, haddii lagu arko.

Mas'uulka dhismaha aad degan tahay

- Mas'uulka ayaa la wargeliyaa markaad guriga ka guureysid.
- Mas'uulka dhismaha ayaa ku qora magaca qofka degan qolka iyo sabuuradda magacyada ee hoos kutaal.
- Mas'uulka dhismaha ayaa laga dalbadaa waqtiga saunada ama baarkinka baabuurta markaad u baahatid.
- Mas'uulka dhismaha ayaad ka heleysaa furayaasha meelaha dadka wadaagaan taasoo qeyb ka ah heshiiska guriga, haddii aadan ka helin qofka guriga kaa kireeyay.
- Mas'uulka dhismaha waxaa laga dalbadaa furayaal dheeri ah ee guriga.
- Mas'uulka dhismaha waxaa la wargeliyaa, haddii qof deriska ahi dhib kuugu hayo iyo wixii ka hor yimaado xeerka ka dabeynta ee dhismaha.
- Mas'uulka dhismaha ayaa la wargelinyaa wixii dayactir ama ku dhejineysid wax dheeri ah guriga kahor inta aada shaqada bilaabin.



KALA XIRIIR

Soogudbinta Wixii cilad farsamo ah ee
laxiriira dhismaha aad degan tahay:

Jenni Juvonen

Habka guri degista ee sooguuraha,
Building Bridges -hanke

044 741 1069

jenni.juvonen@pakolaisapu.fi



COUNCIL OF EUROPE DEVELOPMENT BANK
BANQUE DE DEVELOPPEMENT DU CONSEIL DE L'EUROPE

CEB

COUNCIL OF EUROPE



CONSEIL DE L'EUROPE

Mashruuca waxaa maalgeliyay Golaha
Bangiga Horumarinta ee Yurub.

Pako^{Suomen}**aisapu**

www.pakolaisapu.fi